**Tix:** XGBGM/0038/21 **Tar:** 31 August 2021

**Ku: Madaxweynaha Dawlad Gobaleedka Galmudug = Dhusamareb=**
**Og: Madaxweyne Kuxigeenka Dawlad Gobaleedka Galmudug = Dhusamareb=**
**Og: Guddoomiyaha Maxkamada Sare ee Dawlad Gobaleedka Galmudug = Dhusamareeb=**

**Ujeedo: Soo Gudbin Shuruuc uu Ansixiyey Golaha Sharci-dejinta DGGM**

**Mudane Madaxweyne,**

Iyada oo la tixraacayo warqadaadii sumadeedu aheyd Tix:DGG/XMKG/D0091/6/21 kuna taariikhaysneed 09/06/2021 kana timid Madaxweyne Kuxigeenka DGGM u jeed-keeduna ahaa soo gudbin Hindise Sharciyeedyo ka yimid Golaha Wasiirada si Baarlamaanku uga guto Waajibkiisa Dastuuriga ah.

Golaha Sharci-dejinta DGGM ayaa ku Ansixiyey Kalfadhigiisa 2aad ee Sanadkaan 2021, Fadhiyadiisii 19, 20, 23, 25, 26 iyo 27, Shuruucda kala ah;

1. Sharciga Kalluumeysiga Dawlad Gobaleedka Galmudug Sharci LR:005. 30 June 2021.
2. Sharciga Nidaaminta & Naqshadeynta Magaalooyinka Galmudug Sharci LR:006. 04 July 2021.
3. Sharciga Dakhliga Dawlad Gobaleedka Galmudug Sharci LR:007. 07 July 2021.
4. Sharciga Khidmadaha & Ujuurooyinka Kalluumeysiga Badda Galmudug Sharci LR:008. 11 July 2021.
5. Sharciga Shirkadaha Ganacsiga Dawlad Gobaleedka Galmudug LR:009. 12 July 2021.
6. Sarciga Nootayada Dawlad Gobaleedka Galmudug LR:010. 14 July 2021.

Mudane Madaxweyne adiga oo gudanaya Waajibkaaga Dastuuriga ah waxaan kusoo gudbinaynaa 6 daan Sharci ee kor ku xusan si aad ugu meel-mariso Xeer Madaxweyne, kadibna loogu soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawlad Gobaleedka Galmudug.

M.ne Dr. Maxamed Nur Gacal
Guddoomiyaha
Baarlamaanka DGGM

JAMHUURIYADA FEDERAALKA SOOMAALIYA
DAWLAD GOBOLEEDKA GALMUDUG
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
GALMUDUG STATE OF SOMALIA

Jómhuuriyadda Faderaalka
Soomaaliya
Dowlad Goboleedka Galmudug
Xafiiska Madaxweynaha

جمهورية الصومال الفدرالية
حكومة اقليم جلمدج
مكتـــب الرئيـــس

Office of the President

SHARCI Lr: 006

Tr: 26/2/2022

**ANSIXINTA SHARCIGA NIDAAMINTA & NAQSHADEYNTA MAGAALOOYINKA DOWLAD GOBALEEDKA GALMUDUG**

**MADAXWEYNAHA DOWLAD GOBALEEDKA GALMUDUG**

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 50aad farqadda 12aad ee Dastuurka Dowlad Gobaleedka Galmudug

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 35aad Farqaddiisa 1aad ee Dastuurka Dowlad Gobaleedka Galmudug

**MARKUU ARKAY**: Warqadda Guddoonka Baarlamaanka Galmudug Tix: XGBGM/0038/21 ee 31 August 2021 kuna saabsan ansixinta Sharciga Nidaaminta iyo Naqshadeynta Magaalooyinka Dowlad Gobaleedka Galmudug

**MARKUU TIXGELIYAY**: Baahida ay Galmudug u qabto Sharcigaan

**Waxa uu Madaxweynaha Dowlad Gobaleedka Galmudug soo saaray Xeerkan:**

**Qodobka 1aad:**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo, waxaa la oggolaaday ansixinta Baarlamaanka ee Sharciga Nidaaminta & Naqshadeynta Magaalooyinka Galmudug

**Qodobka 2aad:**

Waxaa uu Xeerkan dhaqan-gelayaa isla maalinta uu Madaxweynuhu saxiixo. Laga billaabo marka la saxiixo, waxaa la baabi'yay Sharci iyo Xeer kasta oo ka soo horjeedo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee Dowlad Gobaleedka Galmudug.

**Mudane, Axmed Cabdi Kaariye (Qoorqoor)**

**Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Galmudug**

Madaxtooyada Galmudug, Dhuusamareeb

Email: Presidency@statehouse.gm.so

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOMALIA

# DAWLAD GOBALEEDKA GALMUDUG

**SHARCIGA NIDAAMINTA IYO NAQSHADEYNTA MAGAALOOYINKA GALMUDUG**

**[ SHARCI LR#006]**

**Dhuusamareb,**
**Galmudug StateJULY 2021**

# TUSMO

SHARCIGA NIDAAMINTA IYO NAQSHADEYNTA ........ 1

HORDHAC ........ 3

**CUTUBKA 1AAD ........ 4**

QODOBKA 1AAD_ERAY QEEXID ........ 4

QODOBKA 2AAD_HORUMARINTA NAQSHADEYNTA MAGAALOOYINKA SII WAARAYA ........ 4

QODOBKAS 3AAD_QORSHAYAASHA HORUMARINEED ........ 4

QODOBKA 4AA D_JIHEYNTA SIYAASADDA GUUD EE DHULKA ........ 5

QODOBKA 5AA D_GUDDIGA NAQSHADEYNTA DHULKA MAGAALOOYINKA ........ 5

QODOBKA 6AAD_WAAJIBAADKA SHAQO EE GUDDIGA NAQSHADEYNTA ........ 6

QODOBKA7AA D_NAQSHADDA GUUD EE NIDAAMINAYSA DHULKA ........ 6

IYO MAGAALOOYINKA (MASTER PLAN) ........ 6

QODOBKA8AAD_NIDAAMKA FARSAMO EE HAGAYA NAQASHADEYNTA MAGAALOOYINKA GALMUDUG EE XAYNDAABKA DHISMAHA IYO MAAMULKA DHULKA ........ 7

(MASTER URBAN REGULATORY FRAMEWORK & BUILDING CODE) ........ 7

QODOBKA 9AA D_JAANTUSYADA/HALBEEGYADA NIDAAMINAYA HANAANKA IYO ........ 8

QODOBKA 10AAD_DIB-U-NAQSHADAYNTA MAGAALOOYINKA ........ 8

QODOBKA 11AAD_DIIWAAN-GELINTA DHULKA IYO DIIWAANKA GUUD EE DHULKA ........ 9

QODOBKA 12AAD_DIB-U-EEGISTA DHAMMAAN SHURUUCDA DHISMAHA ........ 9

**CUTUBKA 2AAD ........ 10**

QODOBKA 13AAD HANNAANKA DIWAAN GALINT XIRFADLEYAASHA SHIRKADAHA DHISMAHA ........ 10

QODOBKA 14AAD_QAABKA BIXINTA QANDARAASYADA ........ 11

_QODOBKA 15AAD_SHARCIYADA QANDARAASYADA AYSAN WASAARADDU BIXIN ........ 11

QODOBKA 16AAD_BIXINTA LAYSINKA INJINEERADA ........ 12

QODOBKA 17AAD_AASAASIDDA GUDDIGA XIRFADLEYAASHA SHIRKADAHA DHISMAHA ........ 12

QODOBKA 18AAD_SHAQADA GUDDIGA ........ 12

QODOBKA 19AAD_XADDI-DAADDA MAS"UULIYADDA ........ 13

QODOBKA 20AAD_GUDDOOMIYAHA GUDDIGA AHNA DIIWAAN GELIYAHA ........ 13

QODOBKA 21AAD_ISTICMAALIDDA CADDAYNTA IYO NATIIJADA DIIWAANGALINTA ........ 14

QODOBKA 22AAD XANNIBIDDA U GANACSIGA SIDA XIRFADLEYAASHA SHIRKADAHA DHISMAHA OO KALE ........ 14

*Qodobka 23aad_Shaqsiyaadka Ka Tirsan Ururo U Shaqeeya Sida Xirfadleyaasha Shirkadaha Dhismaha Oo Kale ........ 14*

QODOBKA 24AD_QEEXIDDA "GANACSI" SIDA XIRFADLEYAASHA SHIRKADAHA DHISMAHA ........ 15

QODOBKA 25AAD_DANBIYADA KA DHASHA WAXYAABA KALA DUWAN ........ 16

QODOBKA 26AA D_FAA"IIDOOYINKA ........ 16

QODOBKA 27AAD_XEER HOOSAADKA ........ 16

QODOBKA 28AAD_TILLAABOOYINKA GUDDIGA IYO KHALADAADKA KA DHASHA ........ 17

QODOBKA 29A A D_DHIIRIGALINTADADAALADA ........ 17

HORUMARINTA ........ 17

QODOBKA 30AA D_XANNIBIDDA DHISMOOYINKA SHARCI DARADA AH ........ 17

QODOBKA 31AA D_ILAALINTA DEEGAANKA IYO DHISMOOYINKA TAARIIKHIGA AH ........ 17

QODOBKA 32AA D_DHAQANGALKA SHARCIGAAN ........ 18

LIFAAQA JADWALKA GUDDIGA ........ 18

(QEEXIDA QODOBKA 3AAD FAQRADIISA 3AAD) ........ 18

## *Hordhac*

1. Sharcigaan waa nidaamiyaha dhismaha magaalooyinka galmudug, waxa uu qaabeynayaa howlaha farsamo ee kala duwan ee la xariira dhismaha dhulka galmudug oo dhan.

2. Waxa uu jaangoynayaa seerayaasha iyo qeybaha dhulka danta guud isticmaalidiisa sida loo qeybinayo ee ku cad naqshadda guud ee magaaleynta, waxa uu tilmaamayaa ujeedooyinka iyo mabaadi'da hagaya maamulka dhulka galmudug.

3. Nidaaminta iyo iswaafajinta danaha bulshada, heer degmo iyo heer gobol.

4. Tilmaamaha nidaamiyahaan waxa uu gacansiinayaa ilaalinta deegaanka iyo diyaarinta siyaasad horumarineed oo hagta qorshayaasha ku wajahan kobcinta ilaha dhaqaalaha ee bulshada,

5. Waxa uu qeexayaa siyaasadaha lagu maamulayo magaalooyinka oo u kala baxaya xaafad, degmo & xarun magaalo oo weyn

6. Nidaamiyahan waxa uu hagidoonaa qorshayaasha iyo habraacyada lagu diyaarinaayo laguna dajinayo, aragti mustaqbaleed oo lagu horumarinaayo, dhismaha iyo seerooyinka galmudug oo dhan, heer gobal, heer degmo iyo heer tuulo.

7. Waxaa loogu talagalay in uu hago whgd&g ee u xilsaaran dib-u- dhiska kaabayaasha dhaqaalaha dawlad gobaleedka galmudug

## CUTUBKA 1AAD

### Qodobka 1aad

***Eray Qeexid***

1. Dib-u-naqshadaynta: waxaa loola jeedaa naqshadeynta magaalooyinka galmudug oo dhameystiran ama magaalo qeybo ka mid ah.
2. Guddi: waxaa loola jeedaa xubnaha guddiga u xilsaaran naqshadeynta dhulka galmudug.
3. Nidaamiye: waxaa loola jeedaa tusmeeyaha nidaamiya magaalooyinka cabiraadaha dhulka, jaantusyada dhismaha iyo afgaradkooda farsamo (standards and building codes).
4. Naqshadayn: waxaa loola jeedaa jaangooyada, khariidaynta dhulka galmudug.
5. Wasaarad: waxaa loola jeeda wasaaradda hawlaha guud ama wasaarad ka tirsan xukuumadda galmudug.
6. Seereynta (zoning): waxaa loola jeedaa dhul isticmaal gaar ah loo naqshadeeyey, waa qaab muujinayaa goobaha hawlaha adeegga lagama maarmaanka u ah nolosha bulshada, degsiimo, ganacsi, iyo xarumaha ciidamada
7. WHGD&G: waxaa loola jeedaa wasaaradda howlaha guud, dib-u-dhiska iyo guriyeynta

### Qodobka 2aad

***Horumarinta Naqshadeynta Magaalooyinka Sii Waaraya***

1. Horumarinta naqshadeynta iyo casriyeynta hawlaha lagu horumarinayo magaalooyinka sii waaraya iyo seereeynta dhulka habka ugu fiican uguna faa'iidada badan.
2. Jaangooyada iyo naqshadeynta magaalooyinka iyo taabagalinta hannaan isu dheelitiran oo looga faa'iideysto kheyraadka dhuleed ee dabiiciga ee jira, taasoo naqshadeynta lagu saleynayo sidii loo dabooli lahaa baahida jiilka hadda jira iyada oo aan waxba loo dhimeyn, fursadaha jiilasha dambe.

### Qodobka 3aad

***Qorshayaasha horumarineed***

**(a) Qorshaha Istraatijiga Ah: (Strategic Planning)**

Waa qorshe lagu ifinaayo, aragtida mustaqbaleed ee lagu horumarinaayo, dhismaha iyo seerooyinka galmudug oo dhan, heer gobal, heer degmo iyo heer tuulo. Kaas oo qeexaya, ujeeddooyinka iyo siyaasadaha hagaya qorshayaasha horumarineed ee ku wajahan kobcinta ilaha dhaqaalaha ee galmudug iyo horumarinta bulshada si loo yareeyo saboolnimada, loona xoojiyo sinnaanta, xaqsoorka iyo caddaalada bulshada, laguna gaarsiiyo hiigsiga himilooyinka (sudd) ee horumarka waaraya.

Sidaa oo kale, waxaa lagu jaangoynayaa fidinta deegaameynta iyo dhismooyinka galmudug hadba baahida mustaqbaleed iyo istcimaalka kala duwan ee la xariira danta guud iyo tan gaarka ah, intaa waxa dheer barnaamijyada mudnaanta leh, wadiiqooyinka lagu hirgelinaayo iyo ilaha dhaqaale ee lagu meel marinaayo himilooyinka qorshahaas.

**(b) Qorshaha Istraatijiyadeed Ee Gobalka(Reginal Strategic Planning)-**

Waa qorshe lagu ifinaayo, aragtida mustaqbaleed ee lagu horumarinaayo, dhismaha iyo seerooyinka deegaanada galmudug sida heer gobal, heer degmo iyo heer tuulo waxaana lagu qeexayaa mashaariicda laga fulinayo dawlad gobaleedka galmudug, muddada lagu fulinaayo iyo kaalinta dhinac walba ay ku leeyihiin laamaha dawladda ee u xilsaaran hirgalintiisa.

**(t) Qorshaha Istraatijiyadeed Ee Degmo/ Magaalo Madax: (Urban Town/District Strategic Planning)-**

Waa qorshe ifinaaya, naqshadda dhuleed ee magaalo ama degmo, kaas oo qeexaya baahida mustaqballeed ee bulshada iyo barnaamijyada lagu horumarinaayo mashaaricda deegaameynta iyo qorshayasha dhaqan-dhaqaale ee heer degmo. Aragtidaas iyo istratiijiyadaas waxaa lagu jaangoynayaa xudduuda iyo baaxadda dhuleed ee u gaar ah magaaladaas ama degmadaas. Naqshadeynta isticmaalka dhuleed ee kala duwan, shuruudaha hagaya dhul seereeynta nidaamka wax loo dhisayo aag walba, mashaariicda laga fulin doono gobalkaas, sidoo kale qaabeynta muddada lagu fulinayo iyo kaalinta dhinac kasta ku leeyahay laamaha dawladda ee u xilsaaran hirgalintiisa.

**(j) Qorshe Faah-Faahsan (Detailed Plan)**

Waa qorshe fulineed iyo sharuudihii farsamo ee hagayay jaantuska dhismaha iyo barnaamijyada laga hirgelinaayo aag walba, sidoo kale isticmaalka dhuleed ee as- aasiga u ah ee ku qeexan naqshadda guud ee magaalada/degmada la guddoonsadey waxaana ku xusan dhammaan mashaariicda horumarineed iyo naqshadihii dhismo ee la xariiray, aagagii dhulka mashaariicda loo qoondeeyay, isku dubaridka iyo hirgelinta qorshe-yaashaas ku cad naqshadeynta guud ee magaalada iyo kaalinta dhinac walba ee laamaha dawladda.

**(x) Qorsheynta Guud, Qeybinta, Seereynta Iyo Isticmaalka Kala Duwan Ee Dhulka (Master Plan Division And Zoning For Land Using)**

Qorshaha guud ee qeybinta dhulka waxaa hagaya hadba baahida deegaan ee jirta, taas oo loo kala saarayo aagag iyo naqshadeyn u kala baxaya tusaale: dhul degsiimo (residential), dhul ganacsi (commercial and industry) dhulka danaha guud sida dugsiyada, isbitaalada, beeraha nasashada, dhismayaasha iyo xarumaha dawladda, garoomada ciyaaraha iwm.

**Qodobka 4aad**

***Jiheynta Siyaasadda Guud Ee Dhulka***

a. WHGD&G ee dawlad gobaleedka galmudug, waa in ay ku dhaqaaqdo dejinta siyaasadda jaangooyada khariidaynta (mapping) iyo naqshadaynta dhulka guud ahaan iyada oo ku salaysan mabaadi'da iyo shuruucda aasaasiga ah ee dawlad gobaledka galmudug.
b. Dejinta siyaasadda guud ee dhulka iyo sharuucda la xiriirta waxaa leh wasaaradda hawlaha guud ee galmudug.
t. WHGD&G ee galmudug iyada oo la tashaneysa xukuumadda dawlad gobaleedka galmudug, waxa ay dejinaysaa siyaasad guud ee deegaameynta galmudug.

**Qodobka 5aad**

***Guddiga Naqshadeynta Dhulka Magaalooyinka***

1. Waxaa la dhisayaa guddi u xilsaaran naqshadeynta dhulka iyo horumarinta magaalooyinka dawlad gobaleedka galmudug oo tafatiran si deeganku ula jaanqaado

horumarka maamulada kale isla markaana looga faa'iideysto khayraadka dhulka.

2. Guddigu waxa uu yeelanayaa, shaqsiyad qanuuni ah ee guud, xaruntiisa waxa ay noqonaysaa xarunta dhexe ee Whgd&G ay ku leedahay caasimadda galmudug, laamana waxa ay ku yeelanaysaa degmooyinka kale ee galmudug.
3. Guddigu waxa uu ka koobanyahay enjineero toos u hoos taga wasaaradda hawlaha guud oo maareya naqshadeynta dhulka.
4. Waxaa hawlaha farsamo iyo aqoonta gaarka ah hormuud ka noqonaya 10 khabiir oo ku xeel-dheer hawlaha naqshadeynta magaalooyinka. Guddigga 80% ugu yaraan waxa ay ka imaanayaan whgd&g ee galmudug.
5. Wixii la xiriira aqoon gaar ah ee laga waayo galmudug iyo dalka, waxaa lala kaashanayaa khubaro shisheeye iyo la taliyayaal xeel- dheerayaal ah si loo daboolo khibradaha iyo culuumta dalka ka maqan ee la xariirta qeybaha cilmiga badaha iyo dhulka (land and ocean scientific fields). Khubarada shisheeye iyo lataliyayaasha xeeldheerayaasha ah ma aha xubno kamid ah guddiga, waxa ayna noqonayaan xeeldheerayaal farsamo oo kaaba guddiga.
6. Xubnaha guddiga iyo khubarradooda waxaa soo jeedinaya wasiirka wasaaradda, waxa ayna ku soo baxayaan xeer madaxweyne.

## Qodobka 6aad

### *Waajibaadka Shaqo Ee Guddiga Naqshadeynta*

1. Waajibaadka guud ee shaqo iyo hawlaha farsamo ee gudigaan loo idmaday, waxa uu noqonayaa:
   A) In ay laamaha dawladda taageero farsamo iyo aqoon ku biiriyaan.
   B) In ay isku dubaridaan qorshe horumarineed oo taxane ah, oo lagu daboolo baahida galmudug ee ka dhalatey dib u dhicii bur-burka, loona dejiyo qorshe gaaban (5-sano & muddada- dheer ee mustaqbalka).
   T) jihaynta qorshaha dib u dhiska galmudug oo ay Whgd&G hoggaaminayso iyada oo la kaashanayso dhammaan dhinacyada ay khuseyso sida dawladaha hoose.
   J) jaangoynta iyo kala qorsheynta dhulka danta guud iyo waafijinta naqshadda guud ee magaalooyinka
   X) qaabeynta siyaasadda guud ee lagu nidaaminayo laguna hormarinayo hawlaha naqshadeynta, is-dhexgalka degmooyinka galmudug iyo ku xiranka mashaariicda waaweyn ee gobalka, (*sdg 2030 and au- regional integration infrastructure framework 2063)*.
   Kh) diyaarinta jaantusyo iyo tusmooyin farsamo (standards and technical guidelines), dib u soo nooleynta xarumo casri ah oo lagu keydiyo loona casriyeeyo naqshadaha galmudug (detailed mappnig).
   C) Soo-jeedin, ra'iyi iyo talasiinta whgd&g si loo habeeyo mashaariicda la xariirta nidaaminta iyo dhisidda magaalooyinka.

## Qodobka 7aad

### *Naqshadda Guud Ee Nidaaminaysa Dhulka Iyo Magaalooyinka (Master Plan)*

1. Xafiiska naqshadaha ee WHGD&G iyo guddiga naqshadaha waxa ay dhulka magaalooyinka u sameeynayaan naqshad guud (master plan), oo lagu muujinayo dhulka loogu talo-galay aag walba.

2. Qeybinta guud ee dhulka iyo seereynta (land zoning) waxa ay u kala baxaysaa, sida so socota: -
   a. Dhul degsiimo ah (resedential), dhul warshadeed & xirfado (industrial & artisanal handcraft). Dhul ganacsiga (commercial).
   b. Danta/danaha guud (public purpose) sida: waddooyinka, garoomada diyaaradaha, dekadaha dugsiyada waxbarasho, jaamacadaha, jardiinooyinka, goobaha nasashada, barxaddaha gaadiidka la dhigto (parking area), xarumaha adeegayada caafimaadka, xafiisyada dawladda, garoomada ciyaaraha, saldhigyada booliiska, xabsiyada, xeryaha ciidammada qalabka sida, masaajiddada iyo goobaha cibaadada, qabuuraha/xabaalaha, maxkamadaha iyo goobaha garsoorka & iwm.

3. Waxa kale oo naqshadda lagu muujinayaa goobaha hawlaha addeegga lagama-maarmaanka u ah nolosha bulshada, sida: korontada, biyo-gelinta, bulaacadaha, telefoonnada & iwm.
4. Ma dhaafi karto naqshadeynta dhulka magaalo, qiyaas dhan5km oo ka baxsan halka dhismuhu joogo. Naqshadeynta si joogta ah ayaa loo fidinayaa waxaana lagu saleynayaa baahida markaas jirta.
5. Waxaa dib-u-eegis lagu sameynayaa naqshadeynta magaalooyinka 5tii sanno mar, iyada oo barbar soconaysa qorshaha horumarinta galmudug (gssp-2) (5 years mid term review (ymtp).

6. Waxaa waajib ah in dhulka deegaanka dadweynaha ( residential ) ee laqorshaynayo loogu tala galo cabirka guud ee dhulka 30% ugu yaraan dhul loo isticmaalo danaha guud ee ku xusan faqradda 1-aad ee qoddobkan.

**Qodobka 8aad**

***Nidaamka Farsamo Ee Hagaya Naqashadeynta Magaalooyinka Galmudug Ee Xayndaabka Dhismaha Iyo Maamulka Dhulka (master urban regulatory framework & building code)***

1. Hawlaha adeegyada bulshada galmudug dhinaca farsamada ee isticmaalka dhulka iyo qaabka hagaya dhismayaasha waxaa lagu nidaamiyey tusmeeyaha farsamo ee habsami-u-socodka dhismaha magaalooyinka waxana uu qaabeynayaa hawlaha farsamo ee kala duwan ee la xariira dhismaha dhulka oo dhan.
2. Nidaamiyaha dhismaha magaalooyinka galmudug ee lagu ansixinayo sharcigan waxa uu qaabeynayaa dhammaan adeegyada guud ee dawlad gobaleedka oo dhan dhinaca farsamadda iyo dhammaan hawlaha wasaaradaha galmudug ee u xilsaaran dib-u-dhiska kaabayaasha dhaqaalaha galmudug ee wasaaradda hawlaha guud ay hormuud ugu tahay dawlad gobaleedka, heer gobal, heer degmo, magaalo iyo tuulo.
3. Nidaamiyaha magaalooyinka waxa uu nidaaminayaa cabiraadaha dhulka iyo halbeegyada/jaantusyada dhismaha (building codes & standards), waxa uuna qaabeynayaa dhul qeybinta, hannaanka seereynta dhulka danta guud, dhammaan qeybaha danta gaarka ah iyo dhismaha kaabayaasha dhaqaale ee galmudug.
4. Waxa uu nidaaminayaa isdhexgalka dhulka iyo dadka, qaabeynta kaabayaasha dhaqaale, tixraaca laga eeganayo naqshadeynta magaalooyinka iyo guud ahaan galmudug.
5. Waxa uu fududeynayaa isku-dabaridka hawlaha kala duwan ee la xariira dib-u- dhiska galmudug iyo naqshadeynta deegaanada galmudug, isku-xirka, isdhexgalka iyo dardar-galinta hawlaha la xariira mashaariicda waaweyn ee galmudug ku xiraya ganacsiga qaranka, kan dunnida iyo kan qaaradda afrika bad iyo berri intaba (trans-africa.

## Qodobka 9aad

### *Jaantusyada/Halbeegyada Nidaaminaya Hanaanka Iyo Hawlaha Dhismaha La Xariira*

1. Jaantusyada/halbeegyada farsamo (techical standard) oo nidaaminayaa cimilada iyo baahida nololeed ee dawlad gobaleedka galmudug, waxaa si gaar ah u leh wasaarado kala duwan.
2. Jaantusyada/halbeegyada waxa ay si tafaftiran u faah-faahinayaan dhammaan hawlaha farsamo ee dhisma walba iyo hanaanka iyo tayada agabka wax lagu dhisayo.
3. Laamaha dawladda iyo wasaaraddaha hoos ku xusan ayaa diyaarinaya jaantusyo u gaar ah oo nidaaminaya dhismayaashooda mana leyska dhisi karo iyada oo wasaaradda hawlaha guud aysan hubinin naqshadda in ay tahay tii loogu tala galey iyo in kale kadibna whgd&g ayaa fasixi doonta, waxaana hey'adahaas ka mid ah:-
    a. Wasaarada waxbarashada: waxa ay si gaar ah u leedahay jaantusyo (standards) nidaamiya dhismaha dugsiyada waxbarashada, daaqadaha iyo qolalalka waxbarashada oo cabiro u gaar ah leh. Jaantusyada xarumaha waxbarashada galmudug waa ay kala duwan-yihiin, waxaana lagu saleeynayaan jaantusyada dhismaha iyo cimilada ka jirta deegaan kasta.
    b. Wasaaradda caafimaadka: waxa ay leedahay jaantusyo kala duwan oo u gaar ah.
    c. Wasaaradda cadaaladda/garsoorka iyo amniga galmudug waxa ay leeyihiin jaantusyo u gaar ah oo nidaamiya saldhigyada booliska iyo dhismooyinka dambi baarista, xabsiyada iyo jeelasha.

## Qodobka 10aad

### *Dib-U-Naqshadaynta Magaalooyinka*

1. Magaalooyinka galmudug guud ahaan ama qeybo ka mid ah, dib ayaa loo naqshadeynayaa, waxaana barbar soconayaa talaabooyin lagu casriyeeynayo hanaanka maamul iyo hawlaha farsamo ee dawlad gobaleedka galmudug.
2. Dib-u-naqshadeynta magaalooyinka galmudug,(re-planning of town-ship) waxaa laga hormarinayaa cilmi-baaris kala duwan oo loogu kuurgalaayo xaaladaha kala duwan ee deegaanada galmudug ka jirta, ilaalinta bilicda magaalooyinka waxaa barbar soconayaa ilaalinta xuquuqda bulshada iyo karaamada aadamaha, waxaana la beegsanayaa mabaadi'da xukun-wanaaga isdhexgalka bulshada iyo himilooyinka horumarinta waarta ee sdg.
3. Dib-u-naqshadeynta waxaa lagu tixgaliyaa, xaaladaha nololeed ee bulshada, duruufaha iyo baahiyaha gaarka ah, waxaana il-gaar lagu eegaa naafada, barakacayaasha iyo danyarta.
4. Guddiga naqshaduhu marka uu ka helo duqa magaalada codsi dib u naqshadayn magaalo (re-planning of town-ship) ama qaybo ka mida ah ama uu arko in ay lagama maarmaan tahay in loo sameeyo dib-u-naqshadayn sida jidad-ballaarin, dib u habayn cabirka jihooyinka degsiimo, raris xeryo ciidan ama xarumo dawladeed iwm, waxa uuna oggolaanayaa in la sameeyo dib u naqshadayn
5. Guddiga naqshadaynta marka uu amro xafiiska naqshadaynta ee wasaarada hawlaha guud, samaynta dib u naqshadaynta, duqa magaalada waxa uu ku baahinayaa tvyada iyo idaacadaha amarka mamnuucida dhisme cusub, dhamaystirka dhisme hore qabyo u ahaa iyo degida dhul cusub gabi ahaanba, muddada la dhammaynayo samaynta naqshada cusub.
6. Duqa magaaladu waxa uu ku wargelinayaa dadka ay dib-u- naqshadayntu saamaynta ku yeelatay muddo saddex bilood gudahood ah.

7. Qiimaynta hantida iyo bixinta mag-dhawga hantida dib u naqshadayntu saamaysay waxa u xilsaaran guddiga naqshadaynta guud.

**Qodobka 11aad**

***Diiwaan-Gelinta Dhulka Iyo Diiwaanka Guud Ee Dhulka***

1. Waxaa sharci ah in la xafido diiwaanka lagu qoro xuquuqda (cadastral) la xariirta dhulka ay maamulayso whgd&g iyada oo wasaarada hawlaha guud ee galmudug loosoo gudbinayo wixii la diiwaan geliyay.
2. Qoraallada la gelinayo diiwaanka waa in ay ku salaysnaadaan xeerarka uu qorayo sharcigan, waana in ay ahaadaan kuwa looga faa'iidaysto lahaanshaha dhulka sida ugu fiican.

**Qodobka 12aad**

***Dib-U-Eegista Dhammaan Shuruucda Dhismaha***

1. WHGD&G iyada oo la tashaneysa laamaha kale ee dawladda ee ku lugta leh arrimaha dhulka iyo dhismaha, waxaana dib u habeyn iyo casriyeyn lagu sameynayaa dhammaan shuruucda iyo xeerarka galmudug ee la xariira dhanka dhismayaasha iyo kaabayashaa dhaqaalaha galmudug (infrastructure) sida ku xusan buugga weyn ee nidaamiyaha waxa ayna kala yihiin:-

   a) Shuruucda dhanka dhismaha (all construction standard codes)
   Shuruucda dhismaha waxa ay ku faahfaahsanyihiin buugga nidaamiyaha waxa ayna ku saleysan yihiin horumarka galmudug iyo qaabka aan wax u dhisanno.
      1- Dhamaan dhismayaasha dhaadheer sida kuwa dabaqyada ah ee magaalooyinka laga dhiso wixii biyaanada hoose ka sareeya waxaa fasixi kara ama ogolaan kara dhismahooda kaliya whgd&g iyada oo ku ilaalineysa in la waafajiyo qaabka magaaleynta ee ku cad naqshadda guud ee magaalooyinka.
      2- Whgd&g waxa ay ka qaadi doontaa dabaq walba khidmo gaaraysa $300 oo ah kharashka injineerada hubinaya dhismaha socda si deegaanka iyo dadkaba loo badbaadiyo.

   b) Shuruucda lagu hubinayo tayada agabka dhismaha (quality control) dhamaan shuruucyada lagu hubinayo tayada agabka dhismaha waxaa laga hubinayaa: agabka dhismaha ee galmudug soo galaya, agabka dhismaha ee dalka laga soo saaro, dhammaan agabyada dhismaha waxaa tayadooda hubinaya sheybaarada whgd&g ee laga helo magaalooyinka galmudug.

   t) Shuruucda bixinta qandaraasyada dhismaha deegaanada galmudug.

   j) Shuruucda diiwaangalinta shirkadaha dhismaha & mashaariicda la xariirta dib u dhiska galmudug.

2. Whgd&g waxa ay diyaarinaysaa hab casri ah oo wax lagu xafido iyo hanaanka diiwaanka guud ee dhulka waana in ay wasaaraddu la socotaa habka uu dhulku u fidayo laguna keydiyaa buugga weyn ee diiwaanka dhulka ee yaallaa whgd&g.

**CUTUBKA 2AAD**
**Qodobka 13aad**
***Hannaanka Diwaan Galinta Xirfadleyaasha Shirkadaha Dhismaha***

1. Sharcigaan ayaa nidaaminaya diiwaan- gelinta xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha.
    a. **Habka diiwaan-gelinta shirkadaha**
    Wasaaraddu kadib marka ay hubsato jiritaanka shirkadda doonaysa in la diiwaan geliyo waxa ay siinaysaa form ay soo buuxiso shirkaddu kaas oo ay ku xusan yihiin shuruudaha diiwaan-gelinta waxaana ka mid ah :-

1- Magaca shirkadda
2- Mas'uulka shirkadda
3- Macluumaadka shirkadda
4- Cinwaanka shirkada lagala soo xiriirayo
5- Shirkadda nuuca ay tahay i.w.m

| Whgd&g ee galmudug waxa ay shirkadaha dhismaha ku diiwaan gelineysaa shati ay ku mideysanyihiin saddex qaybood oo kala ah:-shatiyada | Qiimaha mashaariicda loo ogol yahay-usd | Qiimaha shatiga |
|---|---|---|
| Heerka a | Mashaariicda<br>1,000,000 (hal milyan) iyo wixii ka badan | $800 |
| Heerka b | 500,000 iyo wixi kayar | $600 |
| Heerka c | 300,000 iyo wixii kayar | $400 |
| Heer walba sida a,b & c | Mashaariicda leh qeybaha kale duwan (lots) oo u tilaabi kara tartamo furan ee goobo<br>Kale duwan laga fulinayo | $1,800 |
| Shirkadaha Ajaanibta Caalamiga ah (International Foreign Companies ) | Mashaariicda farsamo Iyo aqooneed ee Aysan awoodin Shirkadaha gudaha Dalka – laakiin xirrir Iskaashi la leh ugu Yaraan shirkad gudaha Ah (local company) | $5,000 |
| Iskaashatooyinka Dhismaha iyo Hawlaha la xiriira (Cooperatives) | Mashaariic waxsoosaar,<br>Kobac dhaqaale iyo xirfadeyn | $300 |

2. Whgd&g iyada oo doonaysa in ay kala xakamayso shirkadaha ka jira galmudug si ay u yaraato is barbaryaaca shirkadaha ayey u sameysaa habka diiwaan gelinta ee sare ku xusan.
3. Shirkad walba oo waddani ah waxaa u bannaan xaqna ay u leedahay in la diiwaan geliyo haddii ay buuxiso sharuudaha shirkadnimo ee sare lagu soo xusay.
4. Dhammaan shirkadaha ka diiwaan gashan whgd&g waxaa waajib ku ah in ay u hoggaansamaan shuruucda wasaaradda iyo kuwa galmudug.
5. Dhacda kasta oo maaliyadeed waa in ay martaa wasaarada maaliyadda Galmudug iyo habraaceeda.

**Qodobka 14aad**

***Qaabka Bixinta Qandaraasyada***

1. Wasaaraddu marka ay diyaariso qiimeynta iyo naqshaddaha hadba goobta la dhisaayo ama la dayactirayo kadib waxa ay bilaabaysaa qaabkan soo socda:-
   a. Wasaaradd hawlaha guud ayaa muddo 7 cisho gudahood ah warbaahinta uga yeeraysaa dhammaan shirkadaha ka diiwaan gashan wasaarada.
   b. Waxa ay u qaybinaysaa dukumintiga tartanka dhammaan shirkaddaha ka soo qayb galay waxa ayna ku soo celinayaan muddada loogu talo galey.
   t. Dukumintaga ayaa lagu furayaa shirkadaha hortooda iyaga oo loo akhrin doono shirkad waliba qiimaha ay soo gudbisay iyo sida ay u soo buuxisay shuruudihiitartanka.
   j. Muddo kooban ka dib wasaaradda ayaa ku dhawaaqaysaa shirkaddii ku guulaysatay tartankaas waxa ayna wasaaraddu ka qancin doontaa shirkadihii haray sida looga guulaystay hadii loo baahdo.

**Qodobka 15aad**

***Sharciyada Qandaraasyada Aysan Wasaaraddu Bixin***

1. Dhammaan shirkadaha xiriirka la leh kana diiwaan gashan whgd&g haddii ay helaan ama ay ku guuleystaan qandaraas dhismo ama dayactir kaas oo laga fulinayo gudaha galmudug, sida mid ka mid ah dhismayaasha danta guud ama kuwa sida gaarka ah loo leeyahay, iyada oo aysan waxba ka ogeyn ama aysan bixin qandaraaskaas whgd&g waxaa laga doonayaa inay racaan qodobadan:-
   a) Shirkadii hesha qandaraas aysan bixin wasaaradda waa in ay shirkadu la soo xiriirtaa wasaaradda ka hor intaaysan billaabin shaqada.
   b) Waa in ay keentaa dukumintiga qandaraaska ay heshay.
   t) waa in ay oggolaataa shirkadu kharashka kontoroolka iyo kormeerka Wasaaradda oo ah 4% totalka guud ee qandaraaska.
   t) waa in ay heshaa warqada fasaxa dhismaha ee whgd&g maadaama ay wakiil ka tahay dhismayaasha xarumaha dawlad gobaleedka galmudug, ayna sharci u leedahay in ay oggaato heshiisyada iyo kharashka qandaraasyada ay wadda galayaan.
   Hay'addaha caalamiga ah iyo shirkadaha dhismo ee galmudug.
   x) shirkaddii lagu helo in ay ku xad gudubtay shuruucda whgd&g laguna arko ayada oo dhisaysa mashruuc dhismo waxa ay muteysaneysaa shaqo joojin iyo ganaax lacageed oo lagu soo saarayo wareegto ka soo baxda whgd&g si waafaqsan shuruucda galmudug.

## Qodobka 16aad
### *Bixinta Laysinka Injineerada*

1. Shirkad walba waxaa waajib ku ah in ay leedahay injineer dhismo oo mas'uuliyad qaadi kara kaas oo lagula xisaabtami doono wixii khalad ah ee ka soo baxa dhismaha ay shirkadu dhistay inta lagu jiro muddada ay wasaaraddu u qorshaysay in lagu oggaado wixii cilad ah ee kasoo bixi kara dhismahaas
2. Whgd&g waxa ay hubinaysaa kalana saareysaa injineerada dhabta ah ee ku takhasusay dhismayaasha casriga ah iyo xirfadleyaasha sheegta injineernimo ee u shaqeeya shirkadaha dhismaha galmudug.

3. Whgd&g waxa ay bixinaysaa warqadda aqoonsiga injineernimo ka dib markii ay baaritaan ku sameyso qofka soo codsaday in loo aqoonsado injineernimo waxa ayna bixinaysaa 4 nooc oo kala ah:-

   a. Heerka 1aad oo ah qofka wada haysta shahaado jaamacadeed iyo khibrad 10 sano ah.
   b. Heerka 2aad oo ah qofka haysta shahado jaamacaded iyo khibrad ugu yaraan 5sano ah.
   t. Heerka 3aad oo ah qofka haysta khibrad dhismo oo gaaraysa 2 sanno.
   j. Heerka 4aad oo ah qofka haysta shahaado balse aan haysan wax khibrad ah.

4. Shirkadii aan u sameynin injineeradeeda laysin ama aan haysan injineer dhismo waxa ay lumin kartaa qandaraaskii ay ku guulaysatay.

## Qodobka 17aad
### *Aasaasidda Guddiga Xirfadleyaasha Shirkadaha Dhismaha*

1. Asaasida guddiga horumarinta xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha.
   Shuruudaha guddigu waa:
   a) In uu ka tirsanyahay hay'ad leh jiritaan dhab ah isla markaana leh shaabad iyo calaamad u gaar ah;
   b) In magaca hay'adda lagu dacweyn karo iyaduna ay wax ku dacweyn karto;
   T) iyada oo la ilaalinayo hadafka sharcigaan ama sharci la xiriira, guddigu waxa uu yeelan karaa xeer hoosaad nidaamiya una fududeeya habsami u socodka hawlhiisa.
2. Guddigu waxa uu yeelanayaa qaabdhismeed u gaar ah: qaybaha, noocyada iyo heerarka/dabaqaadka xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha sida ku faah-faahsan xeer-nidaamiyaha lifaaqa 2aad.

## Qodobka 18aad
### *Shaqada Guddiga*

1. Kadib marka la buuxiyo shuruudaha xeerkan iyo xeer-nidaamiyaha hoos yimaada, hawsha guddiga ayaa noqoneysa:-
   1. Tixgalinta talooyinka farsamo, meelmarinta go'aamadda iyo codsiyada diiwaangelinta xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha, jaangoynta lacagta diiwaan galinta iyo kharashka sanadlaha ah ee ku cad lifaaqa 2aad.
   2. Nidaaminta hawl qabadka iyo hab dhaqanka xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha;
   3. Hubinta iyo kormeeridda meelkasta oo ay ka socoto shaqo dhismo, rakibaad, taagis

ama baddelid si ay u xaqiijiyaan una hubiyaan in shaqadda ay wadaan xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha diiwaan-gashanyihiin ayna waafaqsan tahay nidaamka & jaantusyada (standards) hagaya dhismaha galmudug iyo ilaalinta tilmaamaha xeerarka galmudug.

4. Ka qaadidda tallaabo sharciga waafaqsan xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha ee qabta shaqo dhisme; rakibaad, taagid ama badelid iyada oo aan diiwaan-gashaneyn.
5. Xaqiijinta iyo hubinta in meel kasta oo lagu hayo shaqo dhismo; rakibaad, taagid ama baddelid, ay leedahay boor (tabeelle) ku tusinaya magacyada iyo cinwaanka mashruuca, macaamiisha, lataliyaasha iyo xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha mashruuca; iyo ka qaadidda tallaabo sharciga waafaqsan ciddii aan fullin shuruudahaas.
6. Kor u qaadidda iyo raadinta fursado iyo qalab wax barasho iyo fulinta tababaro loogu tala galey maareynta heshiiska ka hor iyo ka dib iyo dhisidda, taagidda, rakibaadda ama badelidda qaababka iyo wax kasta oo laxiriira.
7. Kor u qaadidda iyo ilaalinta xirfadda iyo sharafta xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha.
8. La talinta xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha dhinaca maamulka iyo farsamada.
9. Isku xiridda iyo la shaqeynta guddiyada xirfadleyda gudaha, kuwa caalimiga ah iyo ururada ka shaqeeya dhismaha.
10. Hubinta in dhammaan goobaha dhismaha la dhawrey; iyo in loo hoggaansamay xeerarka caafimaadka shaqaalaha, badqabkooda, habsami u socodka shaqada iyo shuruucda badbaadada goobaha/dhismaha warshadaha gudahooda iwm.
11. Dib u eegista xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha diiwaangeshan iyo eegista in ay buuxiyeen shuruudaha diiwangelinta marka la eego nooca iyo dabaqadda ay ka tirsanyihiin.
12. Tixgelinta faafinta codsiyada heshiisyo khaas ah oo ay macaamiishu dalbanayan iyaga oo ku hadlaya magaca xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha ee diiwaan gashan.
13. Ka qaadista tillaabo anshaxa waafaqsan xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha diiwan-gashan ee jabiyey shuruudaha sharcigan ama xeer hoosaadka guddiga.
14. Qabashda shaqooyinka kale ee la xiriira danta dadweynaha iyo shaqooyinka wasiirku uu qoraal ahaan ku amro.

**Qodobka 19aad**

***Xaddi-Daadda Mas"Uuliyadda***

1. Khalad ka dhacay ama masuuliyad uu ka gaabiyay xubin ka tirsan guddiga lagama saari karo dusha isaga oo ay ka tahay niyad- sami iyo wax-wanaajin.

**Qodobka 20aad**

***Guddoomiyaha Guddiga Ahna Diiwaan Geliyaha***

1. Guddoomiyaha guddiga horumarinta xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha galmudug waxa uu noqonaya agaasimaha guud ee whgd&g.
2. Guddoomiye ku xigeenka guddiga horumarinta xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha waxa uu noqonayan agaasimaha waaxda dhismaha ee whgd&g.

3. Guddoomiyaha guddiga waxa uu noqonayaa diiwaan gelinaya saxiixa shahaadooyinka diiwaangelinta xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha ee kala duwan.
4. Diiwan geliyuhu waxa uu hoos imaanayaa una gudbinayaa xogta wasiirka.

**Qodobka 21aad**

***Isticmaalidda Caddaynta Iyo Natiijada Diiwaangalinta***

1. Sida guddigu u ogolaaday una diiwaan-geliyey xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha ee magacooda la galiyey diiwaanka ilaa inta magacoodu kujiro diiwaanka looma ogola in ay u shaqeeyaan qaab kale oo ka duwan noocii loo diiwaan-geliyey.

**Qodobka 22aad**

***Xannibidda U Ganacsiga Sida Xirfadleyaasha Shirkadaha Dhismaha Oo Kale***

A. Qofk kasta ama shirkad kasta oo:-
   1. Si khaldan isaga dhigta xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha diiwaan gashan inuu yahay, ama
   2. Isaga oo aan u qalmin sida ku xusan sharcigaan, in uu isticmaalo hab ama magac xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha diiwaan gashan ama magac, nooc ama xaaladaha laga dheehan karo qofkasi inuu yahay qof diiwaan gashan.
   3. isaga oo aan ahayn xirfadle shirkadaha dhismaha diiwaan gashan, inu uu iska dhigo si toos ah ama si dadban in uu yahay xirfadle shirkadaha dhismaha ee aqoonta iyo khibrada leh, hadii uusan hadafkiisu ahayn in uu markaas is diiwaan-geliyo.
   4. isaga oo aan ka mid ahayn xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha diiwaan gashan uu ka fuliyo ganacsi gudaha dawlad gobaleedka galmudug qandaraasle ahaan, waa danbiile markii la xukumana waxaa ku waajibaya ganaax aan ka badnayn boqolkiiba toban(10%) wadarta heshiiska ama mashruuca, kana yarayn boqolkiiba hal (1%) wadarta qiimaha ama mashruuca la fuliyey ama gacanta lagu hayo ama $1000 kun doolar oo lacagta maraykanka ah hadba tii badan ama xarig mudo aan ka yarayn saddex sanadod ama la iskugu daro xarig iyo ganaax labadaba,wasaarada ayaana soo saareysa jaangooyada ganaaxa iyada oo la kaashaneysa hey'adaha garsoorka.

B. Qof kasta oo ku ganacsada magac, cinwaan, ama hab leh kalmado ama jumlooyin ku tusinaya "xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha diiwaangashan" haddii uusan ahayn mid sharcigaan gudihiisa lagu diiwan galshay, xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha, waxa uu ku sifoobayaa ama uu galayaa danbi.

**Qodobka 23aad**

***Shaqsiyaadka Ka Tirsan Ururo U Shaqeeya Sida Xirfadleyaasha Shirkadaha Dhismaha Oo Kale***

1) Ma jiri karo urur, ha ahaado mid ganacsi loogu tala galay ama mid aan loogu tala galin, kaas oo ka qeyb gali kara ganacsiga xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha haddii uusan ka mid ahayn dadka hawlgala ama agaasimayaasha la leh wada shaqeynta, sida guddiga shaqaalaha farsamada iyo khubaro lagama maarmaan ah oo lagu qanci karo fulinta waajibaadkooda ama shirkaddiisa dalbatay ama laga dalbaday in uu qabto hawl gaar ah

sida xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha ee ka tirsan dabaqadda, ama nooca ay dooneyso in uu ka mid noqdo uuna yahay mid diiwaan gashan.

2) Marka uu dhinto agaasime saamile ah yaqaannana farsamooyinka, xirfadaha iyo khibradda looga baahanyahay, kaas oo ka tirsan urur ganacsi ama urur kale oo u shaqaynaya sidii xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha, ururkaas ama qofkaas haddii shuruudaha lagu sheegay faqrada 1-aad aysan ka hor imaanayn waxaa loo ogolaan karaa in uu dhammeeyo mashruuca uu hayo kaliya marka cidda matalaysa ay yihiin xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha diiwaan gashan.

3) Majiro qodob ka mida sharcigaan oo loo fasiri karo in uu siinayso ama u ogolaanayo cid kasta ha ahaado ganacsade ama yuusan ahane in loo diiwaan galiyo ama awood loosiiyo diiwaan galiyaha inuu u diiwaan galiyo cidkasta sidii xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha diiwaan-gashan.

4) Urur ganacsi ama mid kale marka uu buuxiyo shuruudaha diiwaan galinta waxaa loo diiwaan galin kara xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha ahaan haddii la diiwaangaliyana waxa uu si sharci ah u qabsan karaa shaqadiisa sidii xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha diiwaan gashan iyo, haddii ururkaas la diiwaan galiyey ama soo codsaday in la diiwaan galiyo uu ka tixraacay sharcigaan farsamooyinka, khibrada, xirfada, iyo akhlaaqda looga bahan yahay sida guddigu uu ugu cadeyey xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha ama codsade
kasta in uu u fasirto tixraac ahaan sharcigaan marka la eego

Farsamooyinka, khibradda, xirfadda iyo akhlaaqda looga bahan yahay dadka ah agaasimayal ama samilayaal ama dad la shaqalaysiyey ama urur ka qayb qaadanaya horumarka ama haddii uu yahay codsade ka qayb qaadan doona dhaq- dhaqaqyada ururka marka uu shaqadiisa wato xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha diiwaan gashan.

5) Guddigu waxa uu diidi karaa in loo diiwaan galiyo urur kasta xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha ama waxa uu amri karaa in laga saaro diiwaanka magaca xirfadle ka tirsan shirkadaha dhismaha diiwaangashan, haddii ay u caddaato in laga waayey mid ka mid ah agasimayaasha ama saamilayaasha qof haddii uu soo codsado in uu noqdo xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha la diiwaangaliyey la aqabali lahaa iyada oo la eegayo awooddiisa shakhsiyeed.

6) Urur kasta oo qabanaya xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha shaqo ka hor imaanaysa mid ka mid ah shuruudaha qodobkaan waa danbiile xarig muteysan kara ama ganaax aan ka badnayn 5% boqolkiiba shan wadarta qiimaha mashruuca uu heshiiska ku galay, ama xabsi muddadiisu ka yareyn saddex sano ama ganaax iyo xabsi labadaba.

**Qodobka 24aad**

***Qeexidda "Ganacsi" Sida Xirfadleyaasha Shirkadaha Dhismaha***

1. Hadafka sharcigaan waxaa lagu tilmaami karaa qof in uu u ganacsado ama uu u shaqeeyo sidii xirfadle shirkadaha dhismaha ama uu doonayo in uu soo bandhigo ama siiyo qof kale adeeg xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha danta uu ka leeyahay na ay tahay in uu ka helo baddal qiimo leh ama abaal marin, haddii ay adeegyadaas loo soo bandhigay ama loo bixiyay si waafaqsan heshiis shaqo, heshiis adeeg, heshiis loogu tala galay adeegyo ama si kale.

## Qodobka 25aad

### *Danbiyada Ka Dhasha Waxyaaba Kala Duwan*

1. Qofkasta oo khiyaamo sameeya ama sababa ama oggolaada in la galiyo diiwaanka qoraal aan jrin ama aan saxnayn ama nuqul kasta oo laga sameeyo;
2. Si khiyaamo ah ku helay ama isku dayay in uu u helo naftiisa ama u rabo qof kale diiwaanka xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha ama rukhsdada ganacsiga xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha.
3. Si ogaal ah ama ula kac ah u sameeya warbixin khaldan oo ku saabsan shay khaas ah oo loogu tala galay marin habaabin si looga helo sharcigaan faa'iido, tanaasul ama mudnaan, ha u rabo naftiisa ama qofkale, waa danbiile waxaana lagu ciqaabayaa ganaax aan ka badneyn $1000, kun dollar oo mareykanka ah kana yareyn $500 shan boqol oo doolarka mareykanka ah ama xabsi aan ka yareyn lix bilood ama ganaax iyo xabsi labadaba.

## Qodobka 26aad

### *Faa"Iidooyinka*

1. Xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha ee la diiwaan galiyay waxaa laga Doonayaa in ay la yimaadaan qaddarka faa'iidada ay doonayaan oo macquul Ah, kana hor imaaneyn qodobada sharcigaan ama shuruucda kale ee dalka iyo Deegaanka u taalla.

## Qodobka 27aad

### *Xeer-hoosaadka*

1. haddii wasiirku ogolaado guddigu waxa uu sameyn karaa xeer hoosaadyo si waafaqsan sharcigaan si uu u xaqiijiyo ahdaaftiisa una guto shaqadiisa, iyada oo uusaan ka hor imaaneyn ujeedka guud ee sharcigaan sida:-
   - a) Dejinta nidaamka dhaqanka iyo akhlaaqda laga rabo xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha.
   - b) Kala sarraysiinta, kala saaridda iyo caddeynta qeybaha xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha.
   - t) Dejinta xudduuda u kala dhexeysa dabaqdaha iyo noocyada kala duwan ee xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha.
   - j) Dejinta shuruudaha loo baahan yahay si loo helo u qalmidda in laga mid noqdo dabaqad la yaqaan;
   - x) Jaamgoynta lacagaha looga baahan yahay codsiga, diiwaangelinta iyo tan sanadlaha ah, arrinta la xiriirta shahaadada diiwaan gelinta iyo ka saaridda, nuqullada iyo liisaska ama arin la xiriirta qoraallada diiwaanada.
   - kh) Tala ka bixinta qaddarka faa'iidada ee macquulka ah kaas oo uu xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha qandaraasluhu ku darsan karo heshiiskiisa ama adeegga uu bixiyey.
   - d) Kala saaridda ciddii is qabata kuwaas oo dhex- dhexaadiye-yaashii loo saarey ay ku guul dareysteen.
   - r) Sameynta shaahadooyinka, abaal marinada iyo aqoonsiga cidda ka diiwaan-gashan wasaarada in ay u qalanto.
   - sh) Dejinta iyo ogolaanshaha lacagaha diwaangelinta iyo ganaaxyada

dh) Qabashada dhex-dhexaadinta iyo heshiisiinta xubnaha muranku u dhexeeyo ee guddiga iyo xirfadlayaasha.

c) Dejinta shuruudaha loo baahan yahay si loo horumariyo dabaqadaha xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha.

g) Qiimeynta shahaadooyinka, dibloomooyinka, digriiyada iyo warqadaha darjooyinka si loo ogaado in shahaadooyinka, dibloomooyinkaas, digiriiyadaas iyo warqadaha darjooyinka ay buuxiyeen shuruudaha looga baahan yahay.

**Qodobka 28aad**

***Tillaabooyinka Guddiga Iyo Khaladaadka Ka Dhasha***

1. Tillaabo ama ficil guddigu sameeyey waxa ay sharci darro ku noqon karyaa:- haddii tirada xubnaha aysan dhamaystirnayn wakhtiga la sameeyey falka ama laqaaday tillaabta ama khalad ku yimid habka loo magacaabay xubin ka mid ah xubnaha guddiga ama wakhtiga ficilka la sameeyay oo mid kamid ah xubnaha laga saaray ama uusan u qalmin in uu ficilkaas ka qayb qaato.

**Qodobka 29aad**

***Dhiirigalinta Dadaalada Horumarinta***

1. Siyaasadda dawlad gobaleedka galmudug waxa ay dhiirigalineysaa horumarinta iyo hanaqaadka dhismaha iyo khayraadka laf dhabarka u ah galmudug (raw material), bilicda iyo dhismaha guryo, sarooyin kala duwan oo tayo leh.
2. Whgd&g waxa ay bulshada ka gacan siineysaa una fududeyneysaa, dadaalada iyo hindisayaasha kala duwan ee lagu horumarinayo galmudug laguna dardar galinayo dib-u-dhiska dalka.

**Qodobka 30aad**

***Xannibidda Dhismooyinka Sharci Darada Ah***

1. Wasaarada ayaa hubinaysa hirgalka jaantusyada dhismaha sarooyinka iyo inta dabaq ee loogu tala galay goob walba magaalooyinka galmudug.
2. Wasaarada ayaa xanibaysa inta laga hubinayo xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha oo magacooda la galiyey diiwaanka ilaa inta magaciisu kujiro diiwaanka, in uu ogolaaday ama aqbalay qaabka iyo nooca “xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha diiwaan gashan” ee guddigu ogolaaday.

**Qodobka 31aad**

***Ilaalinta Deegaanka Iyo Dhismooyinka Taariikhiga Ah***

1. Ilaalinta badqabka dhul-xeebeedka iyo ka hortaga xaalufka ku socda dhulka galmudug.
2. Wasaaradda arrimaha gudaha, wasaaradda waxbarashada iyo whgd&g waxa ay kawada shaqeynayaa ilaalinta goobaha iyo xarumaha taariikhiga ah ee dalku leeyahay.
3. Waxa ay dabagalayaan heshiisyada caalamiga ah ee la xiriira ilaalinta iyo daryeelka dhismooyinka taariikhiga ah.
4. Waxa ay curinayaan shuruuc  u gaar ah xarumaha taariikhiga ah iyo badbaadinta sooyaalka taariikheed ee dalku leeyahay.

## Qodobka 32aad
### *Dhaqangalka Sharcigaan*

1. Sharcigaan Waxa Uu Dhaqan Gelayaa Marka Ay Ansixiyaan Golaha Sharcidejinta Galmudug Uuna Saxiixo Madaxweynaha Galmudug.

## Lifaaqa Jadwalka Guddiga
### *(Qeexida Qodobka 3aad Faqradiisa 3aad)*

A. Xubunaha guddiga iyo muddada xil hayntooda guddigu waa in uusan ka yarayn 7 xubnood oo uu wasiirku magacaabayo;

1. Guddoomiyaha guddiga waxa uu noqonayaa agaasimaha wasaaradda.
2. xoghayaha guddiga, wasiirka ayaa kasoo magaabaya hawl-wadeenada wasaaradda hawlaha guud.
3. Xubin mataleysa xirfadleyaasha shirkadaha dhismaha.
4. Xubin sharci yaqaanada galmudug
5. Laba xubnood oo laga soo dooranayo ururka injineerada galmudug.
6. Xubin injineer ah oo ka mid ah shaqaalaha wasaaradda.
7. Wasiirka whgd&g ayaa soo magacabaya dhammaan xubnaha guddiga, isaga oo wareegto kusoo saaraya magacaabista xubnaha.
8. Xubin kasta oo ka mid ah guddiga waxa ay xilka heynaysaa muddo aan ka yareyn saddex sano haddii uusan dhiman, is casilin ama uusan jagada ka tagin ama uusan wasiirku kala laaban magacaabsitiisa isaga ooo eegaya danta deegaanka.
9. Wasiirku ayaa buuxin karaa jago si caadi ah uga bannaanaatay xubnimada guddiga, waxa uuna kala laaban karaa kalsoonida xubin kasta isaga oo eegaya danta galmudug, isla markaana waxa uu magacaabi karaa baddelkeeda, isaga oo la tashanaya dadka ay khuseyso.
10. Xubintii doonaysa in ay is casisho waa in ay ogeysiis qoraal ah u soo gudbisaa cidii magacawday.
11. Muddada xil haynayta guddiga waa saddex sano, dib waa loo soo magacaabi karaa mar kale.

B. Fadhiyada Guddiga

1) Guddigu waxa uu yeelanayaa fadhiyo caadi ah iyo kuwo aan caadi ahayn.
2) Shirarka caadiga ah ee guddigu waxa uu qabsoomayaan labadii biloodba mar.
3) Gudoomiyaha guddiga ayaa gaarsiinaya muddada qabsoomida shirka saddex cisho ka hor xubnaha guddiga maalinta qabsoomidda fadhiga.
4) Guddigu waxa uu yeelan karaa fadhiyo aan caadi ahayn hadii uu isugu yeero gudoomiyaha ama 3 ka mid ah xubnaha guddiga ayna qoraal ugu soo gudbiyaan guddoomiyaha guddiga.
5) Xoghaya guddiga ayaa u xilsaaran hadal qoraalka (minutes meeting) shirarka guddiga.
6) Guddoomiyaha haddii maqnaa-shiyihiisa lagu caddeeyay qoraal, xog-hayaha ayaa gudoominaya kulamada guddiga, haddii labadoodu maqnaadaan ogeysiis rasmi ah ka dib xubnaha markaas joogakulanka ayaa u dooranaya mid ka mid ah in uu noqdo guddoomiyaha kulanka.

C. Guntanka (Qourum/Kooramka) Iyo Codaynta Kulamada: -

1) Fadhiga guddigu waxa uu ku qabsoomayaa marka ay joogaan kala bar iyo hal xubnaha guddiga (haldheeri).
2) Shaqada iyo hawlaha guddigu amro in la sameeyo waa in lagu go'aamiyaa qaraarka xubnaha markaas jooga.
3) Go'aanka aqlabayidda xubnaha markaa jooga iyo doorashada kulanka guddiga waa in loo tixgeliyaa in uu yahay go'aanka guddiga.
4) Xubin kasta oo ka mid ah guddiga waxa ay leedahay hal cod, go'aanada guddiga waxa ay ku ansaxayaan cod hal dheeri ah hadii tirada codadku isla'ekaato gudoomiyaha ayaa leh cod dheeraad ah.
5) Iyada oo aan laga hor imaanayn shuruudaha faqrada 1,2 iyo 3, guddoomiyuhu marka uu amro guddigu waxa ay gaari karaan go'aan kulan la'aan ah, iyada oo loo qeybinayo xubnaha waraaqaha la xiriira ayna ku cadeynayaan fikradahooda qoraal, laakiin xubin kasta waa in ay xaq u leedahay in ay dalban karto in la dib dhigo go'aankaas illaa arinkaa looga hadlo kulanka guddiga.